Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

TALO IYO WARBIXIN KU SAABSAN ANTIBIYOOTIKADA IYO CAABUQYADA (INFEKSHANKA)

# Ma hargabsantahay?

## Talo iyo tusaalo ku saabsan duufka, qufaca iyo cuno-xanuunka

ISBN ISBN 978-91-7603-098-1 (pdf) februari 2014

Dadka intooda badan, boqolaal jeer ayuu hargab amma duri ku dhicikaraa inta ay noolyihiin. In kasta oo aanu durigu aheeyn cudur halis ah haddana wuu iska dhib badanyahay. Waxa halkan hoose ku qoran sideed su'aalood oo ku saabsan duriga iyo jawaabahoodii.

### Hargabku waa maxay?

Hargabku ama dureyga waa ka ugu caadisan infekshanada waxana keena fayruska. Astaamaha lagu yaqaano ee lagu garto dureyga waxa ka mid ah duuf ama siin, qufac, cuno-xanuun iyo xummad ama qandho. Sida qaalibka ah, 7 ilaa 10 cisho ayay qaadataa in dureyga lagaga bogsado. Hase yeeshee, qufacu wuu sii heeynkaraa qof ilaa dhawr todobaad.

### Meeqa jeer buu hargabku ku dhaca qofka?

Caruurta ayaa ka duri-qaadis badan dadka waaweeyn. Waxa dhici karta in sanadkii 8 ilaa 10 jeer uu duri ku dhaco caruurta yayar; dadka waaweeynna 2 ilaa 3 goor uu sanadkii ku dhaco. Duri-qaadista dadka waaweeyni se intaa way ka badankartaa, haddii ay caruur ka ag-dhawyihiin.

### Maxaa dawo loo hayaa duriga?

Ma jiraan dawooyin duriga bogsiiyaa. Sidaa awgeed, waxa lagu dadaalaa uun in la sahlo ama la khafiifiyo astaamahiisa. Tusaalo ahaan, duufka badan iyo cabudhaada waxa kaa ladnaynsiinkara dawada sanka lagu buufiyo ee bararka sanka gudihiisa yareeysa. Dawada qufaca waa la qaadankaraa, laakiin badanaa waxtarkeeda laguma kalsoonaankaro. Dawooyinka xummadda hoos u rida iyo kuwa xanuunka bi'iya, kolba sida loogu baahdo, ayaa loo qaadankaraa.

### Dawooyinka antibiyootikadu maxay u bogsiinwaayaan duriga?

Waa micno-darro in la qaato antibiyootika, sida penicillin, haddii aad durisantahay. Taa waxa u sababa antibiyotikadu oo bogsiiyaan xanuunada bakteeriyadu keento, laakiin anay waxba ka tarikarin xanuunada fayrasku keeno. Jidhkaa iskii iskaga daweeya duriga ama hargabka, boron-kiitada iyo qaar badan oo kale oo ka mid ah caabuqyada eef-mareenada saameeya.

### Miyeey qaadashada antibiyotikadu waxyeelo leedahay?

Ma fiicna in la iska qaato dawooyinka antibiyootikada. Waxa dhicikarta in antibaayootikadu kaa idleeyso nooca bakteeriyada jidhka waxtarka u leh, oo halkeedii ay timaado nooca bakteeriyada ee cudur jidhka u keenikarta. Waxa kale oo antibiyootikadu sababikartaa shuban iyo finan ka soo yaaca ogaada. Waxa intaa dheer, iyada oo si fudud bakteeriyadu u yeelato u-adkeeysi. Taa micnaheedu waxa weeyi in bakteeriyadu barato iskacaabiga antibiyooti-kada, haddii qaadashadeedeeda la badsado-

### Goor maa antibiyootikada loo baahanyahay?

Is-diffacidda jidhka ayaa ku fillan, ka hor-tegista infekshanada caadiga ah ee bakteeriyadu keento ee ku dhaco dhegaha, hogaga sanqada iyo xoqadaha ama qumanka. Aad bay u yartahay waxay antibiyootikadu ka tarikarto caabuqyada noocaas ah intooda badan, hadey u badato waxay soo dadajinta ka-bogsiga infekshanadaas. Hase yeeshee, antibiyootikado waxay wax ka tarikaraan sambabada haddii infekshnka halis ahi ku dhaco. Markaas oo kale antibiyootikadu qof way ka badbaadinkartaa caabuqyada dilaaga ah.

Detta är en översättning till somaliska av faktabladet Förkyld? Tips och råd vid snuva, hosta och halsont. Faktabladet går att ladda ner på svenska och flera andra språk på www.folkhalsomyndigheten.se/publicerat-material/

## Goormaad u baahantahay inaad la kulanto takhtar?

DUUFKA: Waa in lala xidhiidha dhakhtarka, marka ay bukoodaan hogaga sanqada, ee ay dadka waaweeyni yeeshaan duuf caabuqsan in ka badan 10 cisho oo isla markaana uu xanuun ba'ani ka hayo dhabanada dushooda iyo ilkaha. Xaaladdaasi oo kale, ayay bilaw ahaan, qaadashada antibiyootikadu waxtar yeelankartaa. Caruurtu muddo dheer ayay duuf caabuqsan yeelankaraan, iyaga oo aan qabin infekshanka hogaga sanqada.

QUFACA: Waxa dhakhtar la tegikaraa markay qufaca weheliyaan xummad ama qandho badani, darreen jirro oo ba'an, neefsiga oo adkaada, hiinraag iyo neef-qaadashada oo damqasho keenta. Arimahaasi waxay tilmaamaan in bukaan infekshan halis sambabada ku dhacay; haddii taasi jirtana waa in antibiyootiku lagula tacaalaa haddii kale halis weeyn ayaa qofka ugu sugnaankarta caabuqa noocaas ah.

CUNO-XANUUNKA: Waxa dhakhtar la tegikaraa marka wax liqitaanku damqasho keeno, weliba marka ay taasi weheliyaan duuf iyo qufac. Waxa haboon inuu qofku is baxnaaniyo dhawr cisho, haddii uu guud ahaan caafimaad qabo, oo aanay cunista iyo cabistu ku adkeeyn.

DHEGO-XAUUN: Caruurta haddii uu ku dhaco dhego-xanuun tegiwaayaa, waa in 24 saacadood gudahood dhakhtarka lagu geeyaa. Haddii ilmaha xanuunka dhegaha lagu arko habeenkii, inta badan waxa ku filan in la siiyo dawooyinka xanuunka jebiya. Haddii uu xanuunku ka tegwaayo amma ilmuhu uu ladnaanwaayo waa in maalinta xigta dhakhtarka loo geeyaa. Haddii uu infekshanka dhegahu ku dhaco hal sano ilmaha ka yar ama ka weeyn 12 sano, waxa loo baahankaraa penicillin. Waa la hakinkaraa siinta penicillin-ta caruurta da'doodo u dhexeeyso hal sano ilaa 12 sano, haddiii dhakhtarku sidaa go'aansado, in kasto oo dhegoxanuunada intooda badani iskood iskaga bogsadaan.

XUMMADDA AMMA QANDHADA: Waxa tegikara dhakhtarka dadka waaweeyn ee yeesha xummad jebiweeyda 4 ilaa 5 cisho iyo darreen jirro oo ba'an oo hargab weheliyo. Caruurta se, mudadaasi in ka yar ayaa dhakhtarka lagu geeynkartaa.

**Haddii aad caabuq ka werwersantahay:** Raadso dhakhtar si loo go'aamiyo xaaladaada caafimaad, oo weeydii inay antibiyootika waxtar ku yeelankarto. Waxaad waliba ka hubisaa in waxtarka antibiyootikadu kaaga faa'iido badanyahay waxyeeladeeda.

## Sidee baad iskaga dhawrikartaa duriqaadista iyo qaadsiinta?

Waxaad duri-qaadista ama duri-qaadsiinta dadka kale, ku yareeynkartaa adigoo badsada farodhaqashada siiba xiliyada hargabku badnayahay. Markaad duri qabtid dadka ha gacan-qaadin. Waxa kale oo aad caadaysataa innad ku hindhistid oo aad ku qufacdid xaggasha gacantaada hoosteeda oo isticmaal warqaddda diifka la iskaga bi'iyo ee marka qudha la isticmaalo.

## ANTIBIYOTIKADU

waa hubka keli ah ee aynu u haysano si aynu iskaga daweeyno infekshanada ee bakteerayadu keento, ee haddii kale loo dhimakaro. Waxa kale oo antibiyotikadu faa'iidooyin waaweeyn ay ka soo hooyaan mararka la sameeynayo qalitaanada muhiimka ah ee khatarta lagu gelikaro iyo 'kansarka' la tacaalistiisa.

Hadi aan badsano qaadashada antibiyootikada waxay keenta in badato u-adkeeysiga bakteeriyada u yeelato antibiyootikada. waxay kordhisaa adkeeysiga bakteeriyada. Dalalka ku yaala Yurubta koonfureed waxa lagu isticmaalaa antibiyootiko ka badan inta laga isticmalo dalaalka waqooyiga Yurub. sidaa awgeed mushkiladda u-adkeeysiga (resistenta) antibiyootikada ayaa dhab ahaan xagga Yurubta koofureed ku badan.

Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

**Solna** Nobels väg 18, SE-171 82 Solna **Östersund** Forskarens väg 3, SE-831 40 Östersund.
www.folkhalsomyndigheten.se